

# HEL KAALMO DHEERI AH OO BILAASH AH INTA LAGU JIRO KORNTO LA'AANTA

Ku soo biir Adeegyadeena Mudnaanta BILAASHKA AH



KORONTO GO'AN?

**WAC 105**



Scottish & Southern  
Electricity Networks

Powering our  
community



# U DIYAARGAROW KORONTO MAQNAATA

LEH ADEEGYO BILAASH AH, MUDNAAN LEH



## WAA MAXEY ADEEGYADEENA MUDNAANTA?

Kuwaani waa adeegyo loogu talagalay macaamiisha kuwaas oo ka faa'iidi lahaa taageero dheeri ah kahor, inta lagu jiro, iyo kadib korontada markay go'do.

## YAA NAHAY

Waxaan nahay Scottish and Southern Electricity Networks Distribution, waxaan ka taxadirnaa fillooyinka korontada gurigaaga keena.

Waa mid degdeg ah fududna in looga biiro **SSEN.CO.UK/JOINPSR**



## WAAD KU SOO BIIRI KARTAA HADDII AAD:

- Isticmaashid agab/gargaar u baahan koronto
- Qabtid cudur daba-dheeraaday
- La nooshahay caruur ka yar shan sanno
- Ka koreysid lixdan
- Tahay camoole ama aragaaga xadidanyahay
- Tahay dhagool ama kuugu adagyahay maqalka
- Qabtid naafonimo
- Qabtid walwal, niyadjab ama xaalad caafimaadka dhimirka ah
- Si ku meel gaar ah taageero ugu baahantahay

Waxaan fahamsanahay in qofwalba uu leeyahay baahiyoo duwan. Haddii aad u maleysid inaad dhibtoon doontid inta lagu jiro koronto go'an, fadlan talo noola soo xiriir.



# SABAB AAN UGU BIIRO?

Iyo sidookale ahaanshaha adeeg si buuxda bilaash u ah,  
Adeegyada Mudnaanta (Priority Services) waxey bixiyaan:



## Cusbooneysiismada koronto go'an

Waxaan ku siin doonaa cusbooneysiisyo ku saabsan koronto go'an, 24 saacadood maalintii. Waan kula soo xiriiri doonaa adiga ama qofka lala xiriiro ee la magac-dhaway.



## Isgaarsiin kuu shaqeysa

Waxaan macluumaadka kuugu siin doonaa far waaweyn, CD maqal ah ama luqad kale haddii aad u baahantahay.



## Degenaan maskaxeed ee badqabkaaga awgeed

Waxaad baasweer u dooran kartaa goorta aan ku soo wacno ama ku soo booqano. Waxey tani kaa dhigeysa mid badqaba.



## Kaalmo samafal inta lagu jiro koronto go'an

Waxaan hiigsanaa inaan caawin dheeri ah bixino inta lagu jiro xiliyada korontada go'an ee dhaadheer. Waxaa tani ku jiri kara laga bilaabo wicitaanada dheeriga ah ee ka yimaada Kooxdeena Adeegyada Mudnaanta marka loo baahdo, ilaa magdhowyada cuntoda, iyo qaabilitaanada bedelka ah sida ka qeyb ahaan xidhmadayada kaalmada. Xaaladaha qaar, waxaan la shaqeynaa golayaasha maxaliga ah iyo adeegyada gurmadka degdega ah si aan u bixino taageero dheeri ah.



## Qorshe Koronto Go'an oo Bilaash ah

Kadib markaad ku soo biirto, waxaan kuu soo diri doonaa Qorshe Koronto Go'an oo adiga kuu gaareysan. Waxaa loo naqshadeeyey baahiyahaaga, waxeyna kaa caawin doontaa inaad fahanto waxa la sameeyo kahor, inta lagu jiro, iyo kadib koronto go'an.

Waa mid degdeg ah fududna in looga biiro **SSEN.CO.UK/JOINPSR**



## TALO BILAASH AH EE KAA CAAWISA INAAD ILAALSATO LACAG



Haddii aad jeceshahay, waxaan talo tamar ee khabiireed kaaga soo qabanqaabin karnaa xulafadeena YES Energy Solutions.

Waxaa tani qeyb ka ah:

- Xidhmo tamar-ilaalin ah oo bilaash ah oo wadata agabyo kaa caawiyo inaad dhintid biilashaada.
- Talooyinka loo ilaashado lacag iyadoo la adeegsanayo tamar yar.
- Baaritaano si loo arko haddii aad heli kartid deeqo si gurigaaga looga dhigo mid tamar hufan adeegsada.
- Baaritaano si loo xaqijiyo inaad heleysid faa'iidooyinka iyo taageerada maaliyadeed ee laguu qoondeeyey.
- Kaalmo ku aadan caafimaadkaaga maskax iyo jireedba.
- Kaalmo iyo waano loogu talagalay doorashada ama ku rakibashada gurigaaga tiknoolajiyado karboonka-kuyarahaya.
- Adeegyada YES Energy Solutions waa bilaash waana qarsoodi.

### Bilaw inaad keydisid tamar:

1 Naga soo wac **0800 294 3259** oo marin u hel waano bilaash ah ee ka socota YES Energy Solutions.

2 Booqo [ssen.co.uk/energyadvice](http://ssen.co.uk/energyadvice) oo buuxi foomka.

3 Markaad saxdid sanduuqa ku yaala qeybta hoose ee foomka, waxaad noo ogolaaneysaa inaan faahfaahintaada u gudbino **YES Energy Solutions**. Waxey kuu soo diri doonaan xidhmo tamar-ilaalin ah dib ayeyna kaa soo wici doonaan.

## WAXA MACAAMIISHEENA YIRAHDAAN

"Waxaan ku fadhiyaa gaari naafio, waxaana qabaa bir saqfaka ku xiran oo koronto ku shaqeysa oo iga caawisa inaan sariirta koro. Ninkeyga sidookale wuxuu daawo ku keydsadaa firinjeerka. Inaan mar sii hore ka digtoonaado khataraha koronto go'oda iyadoo sababtu tahay cimilo xun ama cillabixin la qorsheeyey waxey dhabitii ka caawisaa ninkeyga iyo anigaba inaan mar sii hore is diyaarino. Waxey ka dhigantahay inaan heli karno taageerada saxda ah sifo aan ugu dareeno xaaladan xakameyn iyo badqab."

Marwo Millers, 65 jir



## WAA BILAASH DEGDEG AHNA IN LAGU BIIRO

Uma baahnin wax caddeyn ah ee u-qalmitaankaaga ah. Wuxaan sidookale is diiwangelin kartaa adigoo matalaya dad kale, uu kamid yahay xubin qoyska ah ee aad u maleyneysid inuu ka faa'iidi karayo adeegan bilaashka ah.

**Buuxi foomka, tag onleenka ama wac  
si bilaash ah**

 **0800 294 3259**

 **0800 316 5457** taleefonka fariinta

 **[ssen.co.uk/joinpsr](http://ssen.co.uk/joinpsr)**



Scottish and Southern Electricity Networks waa magac ganaci ee: Scottish and Southern Energy Power Distribution Limited Ku duwan-gashan Lambarka Scotland ee. SC213459; Scottish Hydro Electric Transmission plc Ku duwan-gashan Lambarka Scotland ee. SC213461; Scottish Hydro Electric Power Distribution plc Ku duwan-gashan Lambarka Scotland ee. SC213460; (dhammaan ku leh xafiso duwan-gashan Inverlmond House 200 Dunkeld Road Perth PH1 3AQ); iyo Southern Electric Power Distribution plc Ku duwan-gashan Lambarka Scotland ee. England & Wales No. 04094290 ku leh xafisiyadooda duwan-gashan No. 1 Forbury Place 43 Forbury Road Reading RG1 3JH kuwaas oo xubno ka ah SSE Group [www.ssen.co.uk](http://www.ssen.co.uk)

 @ssencommunity  /ssencommunity

# FOOMKA ADEEGYADA MUDNAANTA

Faahfaahinada xiriirka: loogu talagalay qofka u baahan kara caawin dheeri ah inta lagu jiro koronto go'an.

Cin-waanka	Magaca dambe	
	Magaca awowga	
Cinwaan		
Taleefonka guriga		Koodhka boostada
Taleefonka gacanta		
Taleefonka fariinta		
Baasweerka amniga booqashada guriga (ugu yaraan 10 xarafood) Haddii aad jeclaan lahayd inaan baasweer adeegsano markaan ku soo booqaneyno, fadlan geli halkan:		

## Qofka la magacaabey

Haddii uu jiro qof aad rabtid inaan kuula xiriirno, fadlan nagu sii faahfaahintooda hoos.

Cin-waanka	Magaca dambe	
	Magaca awowga	
Taleefonka guriga		
Taleefonka gacanta		
Xiriirka		

Wixii macluumaaad ee ku saabsan sida aan u uruurino, u keydino, aana uga shaqeyno xogtaada, ka eeg Ogeysiiska Asturnaanta [ssen.co.uk/privacynotice](https://ssen.co.uk/privacynotice) (nala soo xiriir si aad u codsatid nuqul waraaq ah).

Haddii aadan wali u sii baahneyn Adeegyada Mudnaanta, naga soo wac **0800 294 3259** ama nagula soo xiriir fariinta taleefonka ee **0800 316 5457** ama [networks.priority.services@sse.com](mailto:networks.priority.services@sse.com), waxaana kaa saari doonaa diiwaanka.

## **Caafimaad ahaan ugu tiirsan**

- Agab Neefsasho
- Mashiin Wadno/Sanbab or Keli Sifeeyn
- Sifeeyn, matoorka quudinta iyo daawada otomaatika ah
- Adeegsiga Oksijiinta
- Oksijiin Uruuriye
- Careline ama Telecare (uu ku jiro la socoshada wadnaha)
- Qubeysashada caafimaadka ku xiran
- Jaranjaaro-saaraha, sare-uqaadaha ama sariirta korontada ku shaqeysa
- Daawada Firinjeerka la gelio

## **Baahiyaha Da'da la Xiriira**

- Ka weyn 60
- La nool caruur ka yar 5

## **Baahiyaha Dhaqdhaqaaqa**

- Naafu jirka ah
- Gacan dhaqaajin xadidan
- Aan awoodin in cirada la furo

## **Badqabka**

- Joogis dheeri ah ayaa la doorbidaa
- Dareen urin/dhadhan liita
- Biyo ku tiirsan (asbaabo caafimaad awgood)

## **Sidaan u adeegsano macluumaadkaaga**

Si sharci ah ayaa nalooga doonayaa inaan u bixino Adeegyo Mudnaan leh. Si aan kuu siino Adeegyo Mudnaan, waxaan keydin doonaa macluumaadka aad na siisey waxaan midaas u adeegsan doonaa inaan kuugu siino kaalmo inta lagu jiro arrimo degdeg ah, cimilo xun, ama cillad-bixin koronto ee la qorsheeyey. Waxaan midan u sameynaa si ku saleysan xiiso dhab ah iyo rabitaa dadweyn ee muhiim ah (ilaalinta dadka waaweyn iyo caruurta khataro kujira). Waxaan macluumaadkaaga la wadaagi karnaas ururo samafal, bixiyeyaasha koronto, geeyasha gaas, shirkadaha biyaha, maamulada maxaliga ah iyo adeegyada arrimaha degdega ah ee ururadaas si ay u bixiyaan taageero iyo kaalmo ee daruufo gaar ah ama arrimo degdeg ah.

Waxaa lagaala soo xiriiri karaa warcelin ku aadan adeegyadeena.

## **Wadaagida faahfaahintaada**

Daba socota u gudbintaada YES Energy Solutions, haddii aad ku faraxsantahay inaad buuxisid sahan, sax sanduuqa hoose, faahfaahintaada waxaa loo gudbin doonaa qolodeena sadexaad ee adeeg-bixiyeyaasha, si loo sameeyo sahan qanaacis macmiil ah. Faahfaahintaada waxaa adeegsan doona bixiyaha sahanka si uu kaala soo xiriirto wixii quseeya sahanka oo QURA. Haddii aadan jecleyin in sahan lagaa qaado, ha sixin sanduuqa. Haddii aad xili dambe go'aankaaga bedeshid ee ku aadan in sahan lagaa qaado fadlan nasoo ogeysi adigoo naga soo wacaya 0800 294 3259.

Waxaan ogolahay la wadaagida YES Energy Solutions ujeedooyin la xiriira helida waano tamar

## **Xaaladaha Caafimaadka**

- Xanuun daba-dheeraada
- Xanuunka llawshaha
- Xaaladaha Korritaanka (ay ku jirto ootisimka)
- Caafimaadka Dhimirka

## **Baahiyaha Is-gaarsiinta**

- Camoole
- Araga ku adag
- Dhiba maqalka ah (ay ku jirto dhagoole)
- Dhiba hadalka
- Aan awoodin in uu ku hadlo English

## **Baahiyaha Ku-meel-gaarka ah**

- Soo-kabasho isbitaal kadib ah
- Isbedellada nolosha (sida tacsi)
- Masuul guri ee qof yar ka hooseeya 18

## **Luuqada la Doorbido**

## **Sidee baad nagu soo maqashay?**

## **Fadlan u dir:**

Priority Services, Scottish and Southern Electricity Networks, FREEPOST, RTGH-TXXT-ZAEG, Inveralmond House, 200 Dunkeld Road, Perth, PH1 3AQ